

Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiiinta iyo Daryeeleyaasha.

Xulashooyin Siinta ilmahaaga

Wax kala doorashada carruurta loo oggolaado ayaa iyaga ka caawisa in ay ereyo bartaan oo ay wadaxiriirka kordhiyaan ama siyaado u hadlaan. Marka aad carruurta siiso labo xulasho ama labo fursad oo ay kala doortaan, sida “Miyaad rabtaa caano mise casiir?” waxay bartaan sida dadka wax loo weydiisto.

Isku day in aad ilmahaaga weydiiso in ay wax kala doortaan adigoo tusaalooyinkan isticmaalaya

Waqtiga dhar xirashada

- Miyaad rabtaa surwaal mise garan?
- Miyaad rabtaa funaanad mise sharabaad?

Xilliga cuwaafka

- Miyaad rabtaa caano mise casiir?
- Miyaad rabtaa tufaax mise moos?
- Miyaad rabtaa qoriyo dabacase mise sabiib?

Waqtiga ciyaarta

- Miyaad rabtaa gawaari mise jaajuurro?
- Miyaad rabtaa buugga mise tareenka?
- Miyaad rabtaa qalinqoriyo mise tabaashiir?

Xilliga cuntada

- Miyaad rabtaa siiriyal mise rooti duban?
- Miyaad rabtaa digir cagaaran mise digir caadi ah ama harikoo?
- Miyaad rabtaa gadhoodh mise labaniyad?